

«ACCOMPAGNA»: Kordhintaa fursadaha waxbarasho ee carruurta qaxootiga ah

Marka la galayo waxbarashada guud ee dugsiga hoose, carruurta ka soo jeedda qoysaska qaxootiga waxaa caawiya arday ka socota Macadka Tababarka Macallinka ee St Gallen (PHSG).

Waa maxay mashruuca «ACCOMPAGNA»?

Mashruuca "ACCOMPAGNA", carruurta ka soo jeedda qoysaska qaxootiga waxaa taageera arday ka socota Macadka Tababarka Macallinka ee St Gallen (PHSG). Macallimiinta la filayo ayaa soo booqda carruurta ee dhismayaasha dugsiga ilaa lix bilood ah. Toddobaadkiiba mar, cunug kasta waxaa laga siiyaa taageero shakhsiyadeed arrimaha waxbarashada. Mashruucu wuxuu gacan ka gaysanayaa in la kordhiyo fursadaha waxbarasho ee carruurta qaxootiga ah.

Maxaaycarruurtu ka qayb qaadan karaan?

Carruurta ka soo jeeda qoysaska qaxootiga ah iyo carruurta qaxootiga aan la wahelin ah kuwaas oo dhigta dugsi hoose ama dugsiga sare ee bariga Switzerland waxay ka faa'iideysan karaan mashruuca "ACCOMPAGNA".

Maxaa taageerada ka mid ahaan doona?

- Barashada tabaha in la suurtogaliyo ilmaha inuu ku guulaysto sida ugu macquulsan iskuulka.
- Ka shaqaynta casharrada guriga iyo walxaha lagu soo bandhigay fasalka.
- Su'aalaha ilmuu ka qabo nolosha dugsiga (sida jadwalka, manhajka, ama calaamadeynta).

Ardyada waxbaraysa waxay tixgeliyaan baahida iyo awoodaha xaadirka ah ee carruurta waxayna habeeyaan shuruudaha shakhsii ee taageerada macallinka fasalka.

Marka iyo meesha taageeradan laga heli karaa?

Cunug kasta oo kaqeybgalaya wuxuu xaq u leeyahay in la caawiyo toddobaadkii hal mar. Wadar ahaan ilaa labaatan kulan ayaa dhici doonaa muddada saacadaha dugsiga. Taariikhda bilawga ah ee taageerada iyo taariikhaha shirarka ayaa loo habeyn doonaa si shakhsii ah. Kulamada taageerada waxay dhacaan muddada saacadaha dugsiga caadiga ah ee dugsiga ilmaha. PHSG waxay si taxadar leh u diyaarin doontaa oy siin taageero ardaydeeda kaalintan.

Waa maxay kharashka ka qayb qaadashada mashruuca «ACCOMPAGNA»?

Ma jirto lacag laga qaadi waalidiinta ama dugsiyada. Iskuulada waxaa la weydiinayaa oo keliya inay bixiyaan meelo loogu talagalay kulamada taageerada. Mashruuca "ACCOMPAGNA" waxaa maalgaliya PHSG iyo deymaha mashaariicda isdhexgalka ee Dowladda Federaalka (Xoghaynta Dowladda ee Socdaalka) iyo Ururka Paul Schiller, Zurich.

Sidee baa ilmaha loo diiwaan gelin karaa?

Ka dib marka la tashto hoggaamiyayaasha mashruuca, maamulayaasha dugsiga, ama macallimiinta, hal ama carruur badan ayaa loo diiwaangelin karaa ka qayb qaadashada mashruuca "ACCOMPAGNA". Waalidiinta xiisaynaya waa inay la xiriiraan macalinka fasalka ilmahooda.

La xiriir

Maamulka mashruuca: Prof. Dr. Sonja Bischoff, Pädagogische Hochschule St.Gallen, , Notkerstrasse 27, 9000 St.Gallen, accompagna@phsg.ch, T +41 71 243 96 22
blogs.phsg.ch/accompagna/

